



Ilaalinta Nadaafadda Biyaha

Leveled



Af Somali




Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Wuxaan si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2009 T.I.



Save the Children



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.


For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



Ilaalinta Nadaafadda Biyaha

Fasalka 4

Toddobaadka 20



Baraha qaaliga ahow

Waxaa buugan luugu talagalay in uu kobciyo awooda akhriska ee radayda fasalka 4^{aad}.

Waxaaana lagu saleeyay manhajka cusub ee af-soomaaliga. Doorka baruhu aad ayuu mihiim ugu yahay in ardaydu ka faa'iidaystaan buugan.


Sababtoo ah waxaa laga rabaa baraha in uu ku booriyo ama ku dhiirigaliyo carruurta in ay akhristaan buugtan. Hadaba baruhu waa in uu raacaa talaabooyinkan soosocda, marka ay tahay ardaydu in ay ku akhristaan fasalka gudihiiisa.

1. Ka hor intayna ardaydu akhrinta sheekada bilaabin,waa in uu baruhu weydiyaa su'aalaha ka horeeya sheekada.
2. Waa in uu baruhu ardayda siiyaa waqtii fiican ooy ku akhrin karaan sheekada.
3. Baruhu waa in uu usheegu ardayda in ay ku celceliyaan akhriska sheekada.
4. Ardaydu markay dhammeyaan akhisika sheekada ,baruhu waa in uu waydiyaa su'aalaha ku qoran dhammaadka sheekada.

Laylis

Su'aalaha akhriska ka hor

1. Qaabkee loo ilaaliyaa nadaafada biyaha?



Cutubka 1^{aad}: wartarka biyaha

Biyuhu waa lafdhabarta nolosha waa shayga aan laga maarmi karin mar qudha. Biyaha aan cabno miyi iyo magaalaba waa waxyaalaha ugu muhiimsan nolosha aadamaha. Biyaha waxaa saamayn ku yeeshaa isbedalka nolosha aadamaha. sidoo kale isbedalka cimiladu waxay saamayn ku yeelatay hab nololeedkii bulshada.

Taasoo keentay abaaro soo noq-noqda. qaybaha kale ee dalkuna waxay yeeshen roobab xoog badan kuwaas oo sababay daadad iyo fatahaadaha wabiyada. Itoobiya waxaa saamayn ku yeesha arrimaha la xidhiidha isbadalka cimilada sida roobab laxaad leh, fatahaadaha wabiyada kuwaas oo sababay khasaare. Khasaarahaas oo ka dhacay gobolo ka mid ah gobolada deegaanada dalka sida daadki ka dhacay magaalada Jigjiga sanadkii Waxaa la isla qaatay inay ka mid yihiin kuwa sababa cudurada la xidhiidha biyaha. sidoo kale warbixinada ayaa ina tusinaya in abaartii udarayd ee in ay saamayn ku yeelatay in kabadan 8 million oo qof iyo noole badanba. Intaas waxaa dheer saadaalinta hawada oo ay samaysay ururka caafimaadka aduunku waxay ina tusinaysaa(in celceliska heerkulka iyo roobkuba ay ku kordhayaan wadamada bariga Africa.

Sidoo kale buuralayda dalka Itoobiya. waxaa la filayaa inay arrimaha la xidhiidha cimiladu sida daadasha iyo abaaruuhu ay saamayn ku leeyihiin biyaha. Ugu danbayntii biyo gaadhsiinta miyi iyo magaalada waxaa la filayaa inay saamayn ku yeelato isbadalka cimilada aduunku. Taasoo hakad galinaysa joogtaynta adeegyada sidaas daraadeed hirgalinta iyo qorshayaasha bad qabka biyaha cabitaanka ah ayaa lagu sii joogtayn karaa gaadhsiinta biyaha. Sida adeegyada iyo gaadhsiinta biyo nadiif ah waxay ka mid tahay meelaha ahmiyada u leh caafimaadka bani aadamka. badqab ahaanshaha iyo xaalad nololeedka bulsho waynta Itoobiya. Intaas waxaa dheer waxaa fahan buuxa laga haystaa in biyo nadiifa oo bulshada la gaadhsiiyaa ay kaalin ka qaadanayso helida waxbarashada. wax soo saarka dhaqaalaha beeraha oo waxa ugu muhiimsan ay tahay biyaha la cabo.



Cutubka 2^{aad}: adeegsiga biyaha nadiifta ah

Wadanka Itoobiya wuxuu sameeyey qorshaha horumarinta waaxda nadiifinta biyaha iyo gaadhsiinta heer dal. ayaa waxay samaysay nidaam lagu horumarinayo nadiifinta biyaha. Waxaana qorshahan loo hir galinaya si bulshada dalka miyi iyo magaalada loogaadhsiiyo biyo nadiif ah. Dalka Itoobiya waxaa jira habab lagu hawlgalayo laguna maaraynayo biyo gaadhsiinta nadiifta ah miyi iyo magaalaba.

Waxaa ka loo jira kormeero heer deegaan iyo gobol kusalaysan oo marwalba daba gala tayada biyaha. Daraasaadkii la sameeyey ee ku salaysnaa tayada biyaha la cabو sadex meeloodow meel way ka hooseeyeen heerka tayo ee dal iyo caalamba.

Guud ahaan dadaalo ay sameeyeen dawlada iyo ururada bahwadaagta la ahi si ay u hubiyaan xaalada wali dhibaa jira. Sidaa daraadeed wali waxaa jirta dhibaatooyin ubaahan in xal laga gaadho iyadoo la isticmaalayo tabaha iyo qorshayaasha loogu talogalay nadaafada biyaha. Waxaa jira dadaalo badan si loo sii joogteeyo nidaam ku haboon in la helo biyo nadiif ah. waxaana wanaagsan in mar walba la isticmaalo biyo nadiif ah si aan uga badbaadno cudurada. Waxaana jira cuduro fara badan oo ka dhasha nadaafad xumada biyaha la cabو.

Cudurada ka Dhalankara Biyaha

Waxaa jira cuduro badan oo ka dhasha biyaha aan nadiifta ahayn kuwaas oo khatara ilaa heer dhimashana ku keeni kara dadka. Cuduradan oo faafa ayaa ka dhasha biyaha cabitaanka ah ee nadaafadoodu liidato ama aan nadiifta ahayn waxaana cuduradaas kamid ah daacuun calooleedka. Jeermiska midhicirka ku dhaca iyo mataga shuban biyoodka oo ah mid dhibaato badan ku haysa caafimaadka bulshada ee heer dal. Waxay kalooy ka mid tahay tobanka cudur ee ugu horeeya dalka iyo caalamkaba. Mudadii u dhaxasay 2006-2011 waxaa dilaacay shuban calooleed ka wuxuuna sababay dhimasho badan. Shubankan oo kadhalacay qaybaha kala duwan ee dalka inkastoooy la moodo in dhimashada dhalaanku ay hoos udhacday baryahan danbe. Hadana shuban calooleedku waa cudurka sedexaad ee sababa dhimashada carruurta da'doodu ka hoosayso 5-ta sano.

Intaas waxaa dheer inay saamayn kuyeelatay in kabadan 8 million oo dad ah kuwaas oo kunool degmooyinka dooxada meelo ka mid ah dalka.

Dadkaas waxaa ku dhacayoo la soo darsay cuduro dhanka ilkaha iyo muuqaalka ah. Dalka Itoobiya waxaa jira habab lagu hawl galayo laguna maaraynayo biyo gaadhsiin nadiif ah miyi iyo Magaalaba. Taasoo ah in si joogta ah loo hubiyo gaadhsiinta biyaha taas oo lagaga qayb qaadanayo be'ada, kharash iyo sii joogtaynta dhaqaalaha.

Biyo gaadhsiinta magaalooyinka waxaa si sharci ah umaamula gudi si sharci ah ku dhisan. Si loo hubiyo nadaafadda biyaha cabitaanka ee heer dal. dawlada Itoobiya Waxay qaaday talaabooyin iyo qiimayn lagu hubinayo tayada biyaha cabitaanka ah. Waxaana kalo iyana sameeyey hawlgalo iyo dabagalo lagu kobcinayo garaadka aqooneedee bulshada.



Cutubka 3^{aad}: dhibaatada biyaha wasakhaysan

Waxaa loobaahan yahay in la sameeyey daraasaad la xidhiidha aqoonta iyo caafimaadka biyaha ee heer dal. Waxaa kale oo iyana la saamayay kormeerka

heer dal iyo heer deegaan oo kusalaysan tayada biyaha. qorshayaasha loogu talogalay badqabka biyaha si loo sii joogteeyo nidaam ku haboon.

Waxaana in tayadoodu liidato cadaymo waaqici ah u ah cudurada marwalba soo noq-noqda. waxaana lagu caddeeyay daraasaadkii la sameeyey ee ku salaysnaa tayada biyaha la cabbo sadex meeloodow meel way ka hooseeyeen heerka tayo ee dal iyo caalamba.

Tusinaysa in hadii gaadhsiinta biyaha nadifta ah ay faa'iido badan u leeyihiiin yaraynta cudurada shuban biyoodka la xidhiidha boqolkiiba.

Cilmibaadhistii iyo daraasaadkii lagu sameeyey tayada biyaha ayaa tusinaysa in bakteeriya laga helay ilaha biyaha la isticmaalo. Xaaladda tayo xumada biyaha cabitaanka ah waxay soo jiidatay dawlada iyo bahwadaagta horumarinta biyaha si looga doodo loogana tashado waxaana lagu heshiiyey in la

sameeyo. hab xeeladeed guud oo qaran kaas oo lagu horumarinayo qorshaha nadaafadda ama nadifinta biyaha sida logu soo sheegay caqabadaha sare ku cad.

Helitaanka biyo nadiif ah

Intaas waxaa dheer mashruuca kobcinta la qabsashada isbadalka cimilada ee wadamada dhaqaalahoodu hooseeyo waa in tayadiisa kor loo qaado. Waana in laga taageero dhanka dib u soo kabashada iyadoo la adeegsanayo WASH lagana taageerayo dhanka dhaqaalaha iyo dhanka farsamadaba. Arrintan oo ka jawaabaysa dhibaatooyinkii dhanka cabitaanka biyaha, waxaana suurto gal ah in ayna buuxinin shuruudihii loo dajiyey balse waxaa dhacda inay dad badan isticmaalaan kuna xanuun sadaan.

Sababahan dartood tilmaamaha (hagaha) ururka caafimadka Aduunku ee tayada biyaha cabitaanka ah waa in laraaco. Si daa waxaa cilmi baadhish

ku sheegay Isbahaysiga caalamiga ah ee biyaha. Waxana ku talo bixiyeen in la xakameeyo si loo yareeyo khatarta loogana hortago suntan intayana gaadhin bulshada (isticmaalayaasha). Tanna waxaa la suurto galin karaa iyadoo la adkaynayo maaraynta tayada biyaha cabitaanka ah si guul wanaagsan loogaadho.

Go'aan qaadashada ee dhammaan bahwadaagta qorshaha badqabka biyahu wuxuu ururada kala duwan u ogalaanayaa inay si wada jir ah u shaqeeyaan. Waana si ay u sameeyaan go'aan si fiican looga war hayo kaas oo la xidhiidha dhaqaalaha (kharashka) hawlgalka iyo dhanka sharciga maaraynta tayada biyaha cabitaanka ah. waana in la ilaaliyaa biyaha la isticmaalo tayadooda iyo nadaa fadoodda mar walba.

Biyuhu waa aas-aaska dhammaan noolaha ku nool dunida guudkeeda ku dhaqaaqa iyo ku aan dhaqaaqinba ku bad ku nool iyo ku bare ku noolba. Biyuhu waxay muhiimad koobaad u yihiin nolosha,

caafimaadka iyo sharafta aadamaha. Biyuhu waa lafdhabarta nolosha sidaa darteed caafimaadka bulsho kasta wuxuu ku xidhan yahay biyo ku filan oo nadiif ah in ay helaan.

Faa'iidada caafimaadka bulshada waxaa dheer bulshada waxay xaqu leeyihiiin inay helaan biyo nadiif ah oo ku filan dhanka cabitaanka,wax ku karsashada, iyo fayo qabka shaqsi ahaaneed iyo midka deegaaneedba.

Bad qabka iyo ku filaanshaha biyaha cabitaanka ah waxay labaduba faa'iido badan u leeyihiiin inay yareeyaan dhibaatooyin caafimaad ee la xidhiidha biyaha. Garashada xaqiiqdani dawlada Itoobiya waxay samaysay siyaasada qaybta waaxda biyaha iyo qorshaha horumarinta waaxda gaadhsiinta biyaha.

Waxaana dib loo habeeyey nidaamka horumarinta iyo gaadhsiinta biyaha qaybtiiisa labaad. Maadaamo horumar la taaban karo laga gaadhay dhanka biyaha nadiifta ah miyi iyo magaalaba labaatankii sano ee

la soo dhaafay. Siyaasada dhanka helida biyuhu waa mid aad looga baaraan dagay tayadooda,sii joogtayntooda iyo ka hortagida dikhowga ilaha biyaha waa mid muhiim ah.

hadana dhibaatada ugu wayn waxay tahay sadex meelood meel (1/3) bulshada lama gaadhsiin biyo bad qaba oo laga soo saaray ila biyood la xaqijiyeey nadaafadooda. Si loo shaaciyo sharciyada la xidhiidha biyaha cabitaanka,iyo tayadadooda waxaa si gaar ah loo shaaciyeey 2001.

Biyuhu waa aasaaska jiritaanka nolosha bani'aadanka, dhirta iyo dhulka, sida meelo badanba loogu sheegay ama lagaga hadlay. Faa'iidooyinka biyuhu u leeyihiiin nolosha adduunyada ka sokow waxaa kale oo ay sababi karaan qasaarooyin fara badan oo naf iyo maalba leh. Biyaha halkan looga hadlayo waa biyaha-macaan sida wabiyada ceelasha roobka iyo wixii la mid ah ma aha biyaha badda.

Dhibaataada dhinaca biyo-la'aanta adduunka oo ah mid maalin walba sii kordheysa ayaa waxaa nasiibdarro ah in ay ku badan tahay waddamada soo koraya. waddamada ku horumaray dhinaca warshadaha ma aha kuwa ay waqtigan xaadirka haysato dhibaataada biyo-yarida, ayada oo ay sabab u tahay xaaladda jawiga cimiladooda, tirada dadkooda.

Gunaanadkii

Ilaalinta nadaafada biyuhu waa mid saaran qof kasta oo muwaadin ah oo dalkiisa iyo dadkii ka fikiraya. Dhammaanteen saan wada ogsoonahay biyuhu waa lafdhabarta nolosha noola kasta. Wax kasta oo nool waxaay noloshiisu ku tiirsan tahay waa biyaha. Guud ahaa noolaha oo dhan waxay quutaan biyaha waxayna u isticmaalaan siyaabo kala duwan. Tusaale ahaan xayawaan ka baddu ma noolaan karaan shan daqiqo biyo la'aan Sidoo kale khudaarta la beeraa ma noo laan karto biyo la'aan mudo yar. Qofka bani aadanka ah wuxuu u baahanyahay in uu cabbo maalintii dhowr litir oo biya ah. Hadaba maadaama oo wadar ahaan noolaha oo dhan uu biyo u baahan yahay waxaa haboon in aan ilaashano mar walba nadaafada biyaha aan adeegsanayno kuwa aan cabayno iyo kuwa aan ku maydhanayno.

Laylis

Ka jawaan su'aalahan

1. Waa maxay nadaafadds biyuhu?
2. Maxaa ka dhasha biyaha wasa khaysan?
3. Maxaan ka helnaa biyaha nadiifta ah?

